

Barnmorskemottagningar, Regionhälsan
Patientinformation Tyreoidea översatt till somaliska
2025-02-03

Warbixinta bukaan-socodka

Macluumaad loogu talo galey qofka uurka leh isla markaana qaba cilad xagga hawlaha qanjidhada ah

Ummulisadu waxaa ay ka qaadi kartaa tijaabo dhiig oo lagu magacaabo (TSH) dhamaan haweenka uurka leh bilowga uurka si loo ogaado in ay jirto cilad xagga hawlaha qanjidhada

Hawlaha ay qabtaan qanjidhadu waxaa ay u kala gadisnaan karaan siyaabo kala duwan:

- Hawlaha ay qabtaan qanjidhadu waxaa ay noqon karaan kuwo gabi aahaanba caadi ah.
- Hoos u dhac ku yimaada shaqada ay qabtaan qanjidhadu oo afka qalaad lagu yidhaahdo (hypothyreosis), taas oo ay macnaheedu tahay in heerka dheecaanada ee ay soo dayaan qanjidhadu ee lagu magacaabo (thyroxin) iyo TSH-uu kor u koco. Marxadani waa mid inta badan dhacda waxaana lagu daweyo daawada lagu magacaabo (Levaxin®).
- Waxaa kale oo dhacda in uu yimaado kor u kac shaqada ay qanjidhadu qabtaa, waxaana afka qalaad lagu yidhaahdaa (hyperthyreosis), taas oo ay macnaheedu tahay in heerka dheecaanada

ee ay soo dayaan qanjidhadu ee lagu magacaabo (tyroxin) iyo TSH-uu hoos u dhaco. Marxalad noocan oo kale ah ma aha mid caadi ah sida marka la barbar dhigo marka shaqada qanjidhada uu hoos u dhac ku yimaado. Marka qaarkood waxaa loo baahdaa in la qaato dawo ama la sameeyo qaliin.

- Waxaa kale oo suuro gal ah in shaqada ay qabtaan qanjidhadu ay caadi tahay, laakiin hadana tijaabooyinka la qaado ay tusaan in cilad jirto bilowga uurka. Waxaa taas ugu wacan maadaama uu jidhku sameeyo ama soo daayo dheecaano kale, muddada la leeyahay uurka kuwaas oo ay ”dhici karto in lagu qaldamo” oo marka la qaado tijaabooyinka ay muujiyaan in ay jirto cilad xagga hawlaha qanjidhada ah. Waxaa marxalada noocan oo kale ah la sameeyaa tijaabooyin joogto ah si loo ogaado in ay aysan taasi ahaeyn mud sax ah.
- Heerka dheecaanada ay qanjidhada jidhkaagu soo daayaan waa kuwo caadi ah.
- Heerka dheecaanada ay qanjidhada jidhkaagu soo daayaan ee lagu magacaabo TSH kor bey u kacsanyahiin, taas oo ay macnaheedu yahay in shaqada ay qanjidhau qabtaana ay hoos u dhacsantahay.
- Heerka dheecaanada ay qanjidhada jidhkaagu soo daayaan ee lagu magacaabo TSH hoos bey u dhacsanyihiin, taas oo ay macnaheedu yahay in shaqada ay qanjidhada jidhkaagu qabtaana ay tahay caadi laakiin cilad ku meel gaadh ah ay jirto ama shaqada ay qabtaan qanjidhada jidhkaagu ay kor u kacsantahay.

Sida ugu dhakhsa badan ayaa laguula soo xidhiidhi doonaa si lagaaga qaado tijaabooyin kale iyo in ay suuro gal tahay in aad hesho macluumaad uu ku siin doono dhakhtarku

Haddii shaqada qabjidhada jidhkaagu ay hoos u dhacsanyihiin oo aad u baah tahay in aad qaadato Levaxin®

Dumar badan oo uur leh waxaa lagu daweeeyaa oo ay qaataan Levaxin® isla markaana ma jiro wax halis oo la ogyahay oo ay ku keento muddada la leeyahay uurka. Qayb yar oo dumarka ka mid ah waxaa ay dareemaan dhibaatooyin ay tusaale ahaan ka mid yihiin in ay jidhka ka dareemaan kuleyl ama jareyn/gariir, laakiin tan ugu caadisan waa in aan haba yaraatee la dareemin wax is bedel ah muddada la qaadanayo Levaxin®. Qiyaastii inta laga qaadanayo dawada Levaxin® waxaa inta badan loo baahanyahay in la saxo muddada uurka la leeyahay, sidaa darteed waxaa ay ummulisada ku qaabilsba si joogto ah marar badan kaaga qaadi doontaa tijaabo khuseysa dheecaanka TSH ilaa iyo inta laga gaadhayo todobaadka 25-aad ee uurka. Waxaa wakhti fiican ka hor ummulinta aad heli doontaa macluumaad ku saabsan haddii qaadaneyso iyo sida aad u qaadan doonto daawada marka aad dhasho ilmaha ka dib.

- Waxaad heshey rijeeto elegtarooniga ah oo ay la socoto qiyaastii inta qaadaneyso..... µg/maaintii
- Qiyaastii inta aad qaadaneyso waa loo bedeley laga bilaabo..... µg/maalintii ilaa..... µg/maalintii
- Waxaad heshey rijeeto elegtarooniga ah oo dheeri ah..... µg/maalintii waxaa lala qaadanayaa dawadii hore loo qaan jirey waxaa ay markaa wadjir isku noqonayaan..... µg/maalintii
- Waxaa aad sii wadeysaa qiyaasta hadda aad qaadato..... µg/maalintii
- Marka aad ummusho ka dib waxaa qiyaasta aad hadda qadato u bedeli doontaa ilaa..... µg/maalintii

Tijaabada dhiiga ee kan xiga waxaa la qorsheynayaa in la qaado muddo hadda laga joogo qiyaastii.....Todobaad. Ummulisada ku qabilsan ayaa ku sheegi doonta macluumaadka ku

saabsan goobta iyo wakhtiga.

Qofka qaada dawada Levaxin®

Waxaa muhiim an aad ka fikirto in aanad isku mar qaadan kari dawada Levaxin® iyo dawada birta/feerada, maadaama maadada birtu ay hoos u dhigto qaadashada ama nuugista maadad tyroxin. Haddii aad qaadato Levaxin® iyo birta/feerada labadaba – waxaa haboon inaad u dhaxeysiiso qaadashadooda qiyaastii laba saacadood.